



Bulshada oo aad u addeegto waxaad ku heli kartaa kambuyuutar

Ma u baahan tahay kambuyuutar? Free Geek, waa hay'ad macaash doon ahayn oo dib u habeysa qalabka elektarooniga sidii mar kale dib loo isticmaali lahaa, hay'adani waxa ay siineysaa kambuyuutarka miiska ardayda K-12 Portland ee dhammeystira 24 saacadood kana hawlgala hay'adan ama hay'adaha bulshada. Qoysasku hawlhooda mutadawacnimo meel ayey iskugu geyn karaa sidii ay u gaari lahaayeen 24 saacadood si ay u helaan kambuyuutarkaas, habka uu ku shaqeynayo kambuyuutarkuna waa Linux Mint.

Ardayda la siiyo kambuyuutarkaas waxaa looga baahan yahay inay ka qeybqaataan fasal bilaa lacag ah oo lagu barayo sidii ay u isticmaali lahaayeen kambuyuutarkaas. Waxa kale oo la siin doonaa hal sano oo laga caawinayo in loo sameeyo haddii wax ka xumaadaan kambuyuutarkaas.

Hay'adani Free Geek waxay magaalada Portland sanadkii 2000 ka bilowday sidii ay kambuyuutarada uga dhigi lahayd kuwa dib loo isticmaalo ama ay dib u hagaajiso sidii ayna u noqon lahayn khasaare khatar ah. Haddaba, waxa ay u isticmaalayaan sidii ay u caawin lahaayeen dadka aan awoodin dhaqaalihii ay ku iibsan lahaayeen mid cusub ama lahayn aqoontii ay ku isticmaalayeen kambuyuutarka.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad booqataa shabakadan freegeek.org/plug-into-portland ama waxaad wacdaa telefoonkan 503-232-9350.